



200 South Broadway | Green Bay, WI 54303
Phone: (920) 448-2025 | www.gbaps.org

January 8, 2019

Waalidka iyo mas'uulka sharafta leh,

Dugsiyada dadweynaha ee Green Bay waxa ay qabanayaan su'aalo sahan ah oo qarsoodi ah kuwaasi oo ku saabsan jawiga iyo xaaladda iskuulada, su'aalahaasi oo la weydiin doono shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta. Ujeedka su'aalasi sahanka ah waxa weeye in an uruurino akhbaaraad si aan u helno faham balaaran iyo fikrado la xiriira ammaanka iyo bad-qabka dugsiyada, ka qeyb qaadashada ardayda ee hawlaha iskuulada iyo guud ahaanba jawiga dugsiyada.

Su'aalahan sahanka ah waxa sameynayaa ardayda fasalka 3aad ilaa fasalka 12aad. Waxa ayna sameynayaan maalmaha uu iskuula jiro waxana ay bilaabanayaan March 27, 2018. Waa su'aalo qarsoodi ah oo internetka laga sameynayo, ilmahaagana lama weydiinayo aragtidiisa waaya- aragnimo balse waxa la weydiinayaa fikradiihasa uu ka qabo ammaanka ama bad-qabka dugsiyada, ka qeyb qaadashada ardayga ee waxbarashada iyo jawiga dugsiyada. Waxa ad ka eegi kartaa su'aalaha sahanka ee ardayda adiga oo booqanayo websitka wasaaradda waxbarasha dugsiyada dadweynaha ee Green Bay www.gbaps.org/climatesurvey.

Su'aalaha sahanka ee ardayda sidoo kale waa kuwa iktiyaari ah. Haddii aadan rabin in ilmaahaga sameyo su'aalaha sahanka ah waxa aad soo buuxin kartaa qeybta hoose ee warqaan adiga oo kusoo celinayo maamulaha dugsiyada ilmahaaga inta aan la gaarin March 16, 2018.

Xiriirka iyo halka aad ka gali kartid su'aalahaasi waxa lagu soo diri doonaa email usbuuca February 18, 2019. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan su'aalaha waalidka ayaa la soo diri doonaa horraanta February.

Waad ku mahadsantahay tixgalintaada la xiriirta su'alahan adigoo siinaya maamulka gudiga waxbarashada ee degmada akhbaaraad muhiim ah oo naga caawinaya sii hagaajinta dugsiyada.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sahamintan, waxaad la xidhiidhi kartaa aniga ama Xarunta Gargaarka ee Dugsiyada dadweynaha ee Green Bay, (920) 448-2148.

Nabad-galyo!

Michelle Jacobson
Principal, West High School
Dugsiyada dadweynaha ee Green Bay

Ka bixin/ka saarid

WAAN AQRIYAY FOOMKA WAANA KA WARQABAA OO WAAN FAHMAY WAXA AY KU SAABSANYIHIIN SU'AALAHAN SAHANKA AH. **MA DOONAYO** IN ILMAHAYGA KA QEYB QAATO SU'AALAHAN SAHANKA AH.

MAGACA ILMAHA: _____ FASALKA: _____

DUGSIGA: _____ TAARIKHDA: _____

SAXIIXA WAALIDKA: _____